# Maba’adiida Tilmaanta u Ah Dadka Dalkooda Dhexdiisa Ku Barakaca

**Maba'adiida Tilmaanta u Ah Dadka Dalkooda Dhexdiisa Ku Barakaca**

---

**Hordhac Maba'adiida ee Ku-Xigeenka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Samafalka, Modane Sergio Vieira de Mello**

Mujtamaca samafalku wuxu aad u soo garawsanaya dhibaatooyinka barakaca guudaha dalalka oo saameeya in ka badan 20 malyoon oo dad aduun weeynaha ah. In kasto masuuliyadda badbaadinta dadka dal ku barakaca ee saarantahay Dawladda dalkaas, waxa isla markaas muhim ah in mujtamaca aduunku u fiiriyo sida ugu haboon oo ee gacan uga geesanlahayeen badbaadinta dadka ku barakacay iska horimaad iyo xaaladu dhabaqsan. Waa in ee nu kalmada samafal u qorsheeyno si ee u noqoto mid badbaadada dadkaas wax u tarta.

Qaramaha Midoobay gudeheeda, waxa laqaaday talaabooyin muhim ah si kor logu qaado waxtar meelmar ah oo deg deg ah oo ka jawaabaaya bahida dadka dal gudihiis ku barakaca. Gudiga Joogtada ah oo Haya'aduhu ee u Dhanyihiin aya ii xilsaaray masuuliyadda in aan ahaado Xiriiriyaha bahda Qaramada Midoobay ee arrimaha dadka dal gudihiisa ku barakaca. Aniga oo fulinaaya wajibkaas, waxaan xil iska saaray in aan kor u qaado awooda Qarmada Midoobay oo dhan si ee wax uga qabato xaaladaha barakaca gudaha iyo isla shaqeeyn haya'ad walbi ee ogtahay masuuliyadeeda isla markaas na kor loo qaado awood ha'ayadaha fulinta.

Anigo arrintaas tixraacaaya, waxaan soo dhoweynaayaa shaacinta u sameeyey Wakiilka Xoghayaha Guud ee ku saabsan Maba'adiida Tilmaanta u ah Dadka Dal Gudihiis ku Barakaca. Maba'adiidaas oo ku saleysan shuruucda samafalka caalamiga ah oo jirta iyo xuquuqda aadamiga ah, waxaa logu talagalay in ee tusaale u noqdaan dawladaha iyo ha'ayadaha samafalka iyo horumarinta si ee kaalmo iyo badbaado ugu fidiyaan dadka barakaca.

Gudiga Joogtada ah oo Haya'adahu u Dhanyihiin wuxu si buuxda u taageeraya Maba'adiida Tilmaanta ah, wuxuna ku dhiirigeliyey xubnihiisa in ee u baahiyaan xubnaha Golayaashooda Sare iyo shaqaalahooda, siiba kuwa ku sugan goobaha shaqada, si ee u hubiyaan in Maba'adiidaas ee ku dhaqmaan marka ee fulinayaan shaqadooda la xiriirta dadka dal gudihiisa ka barakacay.

Waxaan rumaysanahay in Maba'adiida Tilmaanta ah qeeb fiican ka qaadankaraan ku baraarujinta bahiida dadka dal gudihiis ku barakaca, isukeenida kalmo ee mujtamaca ha'aydaha samafalka iyo ku kaalmeeynta dadka ku hawlan goobaha shaqo sidii ee u helilahaayeen xalalka munaasibka ah marka ee la kulmaan arrimo la xiriira badbaadinta iyo gacan siinta dadka barakacay. Maba'adiidu, sida oo kale by Dawladaha u suuragelineesa in ee dadkooda barakacay u fidiyaan nabadgelyo iyo nolol fiican.

Waxaan rajeenaya in qof kasta oo idinka mid ah oo uu hawlgelidoono si uu hubiyo baahinta iyo fulinta ugu balaaran ee Maba'adiidaas, si loo gaadho horumarka loga bahanyahay xaaladda iyo wax u qabadka dadka dalalka gudahooda ku barakaca.

**Horudhac Fahfaahin ah ee Wakiilka Xoghayaha Guud ee Dadka Dal Gudihiisa ku Barakacay, Mudane Francis M Deng**

Beesha caalamiga ah waxaa soo wajahay waajib adag sidii loo hubin lahaa badbaadinta dadka si khasab ah oo ee keentay loolan dagaal loga barakiciyey guyahoodii, ku xadgudub weeyn ee xuquqda aadamiga ah, iyo tabaalooyin kale oo soo gaara, isla markaas na weli ku sugan dalkooda dhexdiisa. Guud ahaan waxay la kulmaan hantii ka qaadid weyn, dhib iyo takoorid. Maba'adidaan waxa logu talagalay oo loo sameeyey si loga hortago dhibaatooyinka soo foolsaaraya dadka dalkooda gudihiisa ku barakaca.

Maba'adiido waxay tilmaamayaan xuquqda iyo ballanqaadka la xiriira badbaadinta dadka dal gudihiisa ku barakaca maraaxiilta barakacaas oo dhan. Waxay suuragelinayaan ka badbaadinta barakacin sharci daro ah, sugid badbaadin iyo kalmo haddi barakac dhaco iyo qeexid nabadgelyo ugu noqosho, degin ama deb dhexgelin mujtamacii ee ka barakaceen. In kasta oo Maba'adiidan ee yan ahayn mid Dawladaha khasab ku ah, waxay ka jawaabayaan lana socdaan xuquuqda baniaadamnimada ee caalamiga ah iyo sharciyada samafalka iyo qaxootiga u degsan.

Sida daraadeed, habaynta shurucda iyo xafiisyada ee u bahantahay hawsha dadka dal gudihiis ku barakaca, dirid wofuud kala xaasha Dawladaha arrimahooda, aya u badan hawlahayga. Anigo la kaashanaaya koox sharci yaqaan caalami ah, waxaan dersay ama fiiriyey heerka sharciyadda caalamiga ah oo jira ee ka hadlayaan dadka dal gudihiis ku barakaca, markaasan soo saaray "Ururin iyo Falanqeen Shuruucda Caadiga ah" (E/CN.41996/52/Add.2). Diraasadu waxay cadaysay, in kasto shuruucdu ee si faahfaahsan wuga hadlayso dadka dal gudihiisa ku barakaca, waxaa jira qeebo muhim ah oo ee ka gaabisay sidii ee u siin lahayd gundhig adag oo badbaado iyo kalmo logu fidinlaha. Sida daraadeed by Gudiga iyo Golaha loo Dhanyahay ee Qaramada Midoobay iga dalbeen in aan diyaariyo nidaam guud oo ku saabsan dadka dal gudihiis ku barakacay. Taas waxay dhalisay qoritaanka Maba'adida Tilmaanta ah oo ku soo celineesa nidaamyadii hore u jiray, cadaynta meelaha mogdigu ku jiro iyo daboolida waxyaabaha ka dhinna arrintaas.

Markii aan Maba'adiida Tilmaanta ah u bandhigay Gudiga sannadkii 1998, wuxu soo saaray goa'an tixgelinaaya Maba'adiida iyo soo jeedintaydii, anigo ah Wakiilka Xoghayaha Guud, in aan u gu isticmaalo wadahadalada ila socday Dawladaha iyo ha'ayadaha kale oo shaqadood la xiriirta dadka barakaca. Gudigo wuxu kalo tixgeliyey goa'ankii Gudiga Ha'ayadaha Qaramada Midoobay ee u Dhanyihiin, oo soo dhoweeyey Maba'adida, oo isla markaas ku dhiirgeliyey in ee ku baahiyaan Gudiyadooda Sare iyo shaqaalahooda, siiba kuwa goobha shaqada jooga, isla markaas na ku dhaqmaan marka ee wax u qabanayaan dadka dal ku barakacay.

Maba'adiidaas, waa in ee u noqdaan tusaale qiima leh Dawladaha, ha'ayadaha kale oo ee khusayso, ha'ayadaha Dawladuhu ku bahoobeen, ha'ayadaha samafal oo aan dawlad ka tirsaneeyn, marka ee wax u qabanaayaan dadka barakacay. Waxaan rajaynaaya in aad loo baahiyo si meel mar ah na loo isticmaalo

## MABA'ADIIDA TILMAANTA U AH DADKA DALKOODA DHEXDIISA KU BARAKACA

---

## HORUDHAC: NUXURKA IYO UJEEDADA

1. Mabaadiida assasiga ah waxay ka hadlayaan bahida gaarka ah ee dadka dalkooda dhexdeesa ku barakaca, meel kasta aduunka haka joogeen eh. Waxay qeexayaan xuquuqda iyo damaanadaha la xiriira ka hortaga dadkaas in aan la barakicin, badbaadadooda iyo gargarkooda haddii ee barakacaan iyo sida oo kale marka ee ku noqonayaan guryhoodii ama meel kale oo ladejinaayo.
2. Marka laga hadlaayo mabadiidaas, dadka dalkooda dhexdiisa ku barakacay, waa qofaf ama kooxo ee khasab ku noqotay in ee ka cararaan ama ka tagaan guryahoodi, gaar ahaan taas oo ee sababtay si ee uga badbadaan iskahorimaad hubaysan, xaalad nabadgelyo laan guud, ku tomasho xuquqda aadamiga ah ama dhibaatooyin ka dhashay dabeecada ama dad, isla markaas na aan ka gudbin xudud caalami ah.
3. Mabadidaas waxay ku saleesanyihiin oo ujeedu la wadaagaan mabaadida caalamiga ah ee xuquuqda aadamiga ah. Waxay tilmaan u yihiin: (a) Wakiilka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay xagga dadka dalkooda dhexdiisa ku barakacay, si u u fuliyo wajibaadkiisa; (b) Dawladaha marka ee la soo gudboonaato xaalad dad ku barakacan dalka gudihiisa; (c) dhamaan haya'adaha iyo kooxa marka ee la soo gudboonaato xaaladda dad arrintaasi ku dhacday; (d) Ururada dawladuhu ku bahoobeen iyo kuwa samafalka, markii ee ku howlanyihiin barakac dal gudihiisa ka dhacay.
4. Mabaadiida tilmaanta ah oo assasiga ah waa in si guud loo baahiya oo lo hirgeliya.

## QAYBT 1- MABAADIIDA GUUD

### Mabda'a 1

1. Dadka dalkooda dhexdiisa ku barakaca waxay xaq u leeyihiin, si siman, isla xuquqda iyo xuriyaadka ku salysan shurucda caalamiga ah iyo kuwa dalka oo ee leeyihiin dadka kale oo dalkaas degan. Lagamana takoori karo helitaanka xuquuq iyo xuriyad kasta iyada oo lagu saleeynaayo in ee yihiin dad dalka gudihiisa ku barakacay.
2. Mabaadidaasi kama horimanaayaan masuuliyadda shakhsi ee dembe oo hoos imaaneesa sharciga caalamiga ah, siiba kuwa la xiriira ciribtirka, dembi ka soo horjeeda baniaadamnimada iyo jareemadaha dagaal.

**Mabda'a 2**

1. Mabaadidaas waxa ilaalinaaya  oo hernagelinaaya haya'ad kasta oo awood leh, kooxo ama ashkhaas, iyada oo aan loo eegeen xaaladooda sharci oo eeyan ku jirin takoorid waxyeello leh.  Ilaalinta mabadiidaas wax u ma dhimikarto xaladda sharci oo hayad, koox ama qof oo arrintaas saameeso.
2. Mabaadiidaas lo ma arki karo kuwa wax ka bedelaaya ama wax u dhimaaya qodoba kasta ee xuquuqda aadamiga ah ama shuruucda caalamiga ah ee samafal iyo xaqqa awooda ka faaiideesi magangelyo dalal kale.

**Mabdaa' 3**

1. Haya'adaha qaranka ayu saaranyahay wajibka iyo masuuliyadda koobaad in ee badbaadiyaan samafal na u fidiyaan dadka ku barakacay dhulka ee ka taliyaan.
2. Dadka ku barakacay dalkooda dhexdiisa, waxay xaq u leeyihiin in ee weediistaan oo ee na ka helaan badbaadin iyo kalmo baniaadamnimo haya'adahaas qaran. Dalabka noocaas ah ku ma mutaysan karaan ciqaab.

**Mabda'a 4**

1. Maba'adiidaas waxaa loo fulinaaya si aan takoor nooc kasta ah u san ku jirin, sida mid isir, midab, lab iyo dhadig, diin ama caqiido, sayaasad ama ra'ayi kale, qomiyad, qolo, qabill ama xaalad sharci ama dhaqan, cimri, naafanimo, hanti, dhalasho, ama wax kale oo la mid ah.
2. Qaar ka mid ah dadkaas dalkooda ku barakacay, sida caruurta, weliba kuwa yar yar oo aan lala socon, haweeynka uurka leh, hooyooyinka caruur watta, qoosaska haween u madax yihiin, dadka tamartoodu dhimantahay ama naafada ah iyo waayeelka, waxay xaq u leeyihiin badbaadinta iyo kaalmada ee keentay xaaladoodu iyo mucaamalo ka jawaabeesa xaaladooda gaarka ah.

**QAYBTA II – MABA'ADIIDA LA XIRIIRA KA SAMA BIXINTA BARAKAC**

**Mabda'a 5**

Haya'adaha qaran iyo kuwa caalamiga ah oo dhan wayey ixtiraamayaan isla markaas na hubinaayan ixtiraamka wajeebaadka saran xaqqa sharciga caalamiga ah, oo ee ka mid yihiin xuquuqda aadamiga iyo sharciga samafalka, ee xaalad kasta, si loga badbaado lagana nabad galo xaalado keeni kara barakac dad.

**Mabda'a 6**

1. Qof kasta oo baniaadam ah wuxu xaq u lahaanaya in la laga iilaaliyo in si takrifal ah loga barakiciyo gurigeeda ama meesha ee degantahay.

2. Mamnuucidda ku takrifal barakicin waxa ka mid ah barakicinta:

    (a) Marka ee ku salaysantahay sayaasado kala qoqobid (apartheid), ciribtir cunsuri ah iyo falal la mid ah oo u jeedadood tahay si loo bedelo nasabka, diinta ama midbka ee ka koobanyihiin dadka barakacaasi khusayo;
    (b) Xaaladu iska horiimaad hubaysan, haddi badbaadinta dadka rayidka badbadadooda ama laga marmi waa sababo ciidan ee yan kalifin;
    (c) Xaalad dhismo mashruuc horumarin ee weyn oo ku salaysan duruf ee khasabtay baahi guud;
    (d) Xaaladaha dhibaatooyinka waaweyn, haddi ee yan khasbin rariid lagu badbaadinaayo iyo caafimadka dadka ee so foodsartay; iyo
    (e) Markii loo isticmaalo ciqaab loo dhanyahay.

3. Barakacaasi waa in u san ka dheeraan inta bahida duruufta keentay ee jirto.

## Mabda'a 7

1. Ka hor inta aan goa'an keenaaya barakicin dad, dawladda ee arrintu khusayso waa in ee hubisa in talaabooyin kale oo barakiciintaas ka haboon la qaadi karo si loga marmo. Haddi xal kale la waayo, waa in la isku dayaa talaabo kasta oo yareyn karta barakicintaas dhibaatoonka ka imanaaya.
2. Dawladda talabada barakiciinta fulineeysa waa in ee hubisaa, sida ugu suuragal weyn, in dadka barakacaaya loo helo degaan ku haboon, iyo in rariddaas lagu fuliyo xaalad loo aqbali karo xagga badbaadada, nafaqada, caafimaadka iyo nadaafadda, iyo in aan la kala kaxeeyn xubnaha qoys.
3. Haddi barakac iyo dhibaato timaado, waa in la hubiya wajibaadkan lagama marmaanka ah :

    (a) Goa'an khaas ah waxa qaadanaaya haya'ad Dawladeed oo arrintaas sharci u banaynaayo;
    (b) Talaabooyin haboon waa in la qaada si loo hubiyo in dadka barakacaaya war buuxa la siiyo iyada oo loo cadaynaayo sababha khasbay in la raro, sida loo raraayo, iyo haddii ee suragasho cawil celin iyo dib-u-dejin;
    (c) Waa in la raadiya war helka iyo ogolaanshaha dadka barakacaaya;
    (d) Ha'ayadda rareeysa dadkaas waa in ee kala tashata, siiba haweeynka, qorsheeynta iyo fulinta deb-u-dejinta;
    (e) Talaabooyin sharci fulin, meshe loo baahdo, waxaa fulinaaya haya'adda sharci ahaan ku haboon; iyo
    (f) Xaqa talabo saxid meel mar ah, oo ee ka mid tahay dib u fiirinta haya'ada garsoor, waa la tixgelinaaya.

**Mabda'a 8**

Barakacaas laguma fulinay hab ku xadgudbaya xuquuqda nolosha, sharafta, xonyadda iyo nabad ilaalinta dadka tabaalooby.

**Mabda'a 9**

Dawladdaha waxaa ka saran wajib khaas ah in ee ka hortagaan barakicinta dadka dhulka u dhashay, aqaliyaadka, beeraleeda, reer guuraga iyo kooxa kale oo leh baahi ku tiirsanaan iyo jeceel dhulkooda.

## QAYBTA III – MABA'ADIDA LA XIRIIRTA BADBAADINTA WAQTIGA BARAKACA

**Mabda'a 10**

1. Qof kast oo a'adami ah wuxu xaqqa asliga ah u leeyahay nolol, taas oo sharcigu ku badbadinaayo. Qof na , dhadig iyo lab ba, noloshiisa lagama qaadikaro. Dadka dalka ku barakaca waxaa si gaar ah looga badbadinaaya:

   (a) Cirib tir;
   (b) Dil;
   (c) Dilid guud ama ku takrifal xukun oo lagu dilo; iyo
   (d) Qarin khasab ah oo ee ka mid tahay afduubid, ama xirid qarsoodi ah iyo hadidaad keeni karta dil.

   Hadidaad iyo guubabo keeni karta falalka kor ku xussan waa mamnuuc.

2. Duulimaad ama falal dagaal oo lagu qaado dad dalka gudihiisa ku barakacay, isla markaas na aan qeeb ka qaadaneeyn colaad, sina looma ogola. Dadkaas barakacay, waxaa si khaas ah laga badbaadinaaya:

   (a) Duulimaad ama falal dagaal oo toos ah, oo ee ka midyihiin iyada oo la sameeyo goobo la ogolaado in dadka rayidka ah la weeraro;
   (b) Macaluulin oo hub dagaal lo isticmaalo;
   (c) Iyado laga dhigto gabaad goobo dagaal ama gabbad loga dhigto si dagaal loga hortago;
   (d) Duulimaad lagu qaado xeryahooda ama degaankooda; iyo
   (e) Isticmaal miinada dad-dilka ah.

**Mabda'a 11**

1. Qof kasti wuxu xaq u leeyahay sharaf, jir, dhimir iyo dadnimo aan wax loo dhimin.
2. Dadka dal dhexdiisa ku barakaca, xaalad xuriyadoodo sugantahay ama dhimantahay ba, waa in laga badbaadiya:

    (a) Kufshaso, jir gogoyn am jir dilid, raxmadlaan, baniaadamino xumo ama falal ama ciqaab oo sharaftooda wax u dhimaaya,  oo ee ka mid yihiin kuwa ku abbaaran haweyn ama rag, jir iibin khasab ah ama wax kasta oo sharafta wax u dhim kara;
    (b) Adoonsi ama wax la mid ah, sida iyado lo iibiyo guur, u isticmaal jir iibin ama caruur shaqo lagu khasbo; iyo
    (c) Falal dagaal oo loogu talagalay in argagaxin guud lagu dhaliyo dadkaas dalkooda gudihiisa ku barakacay.

    Hadidaad iyo guubaabo dhiirigelinaysa falalka kor ku xusan waa mamnuuc.

**Mabda'a 12**

1. Qof kasta wuxu xaq u leeyahay xuriyad iyo badbaado shakhsi. Qof na loma adeegsankaro qabsasho ama xirid aan sharci ahayn.
2. Si xaqaas logu hubiyo dalka barakaca dalkooda gudihiisa, laguma hayn karo ama xayirikaro xero.  Haddii duruuf aan caadi ahayn ee khasabto hayntaas ama xayiraadaas, waa in ee yan ka dheeraan inta duruuftaas jirto.
3. Dadka ku barakaca dal guudihiis waxaa laga ilaalinaaya fagoorid xarig ama hayn ku salaysan xaladooda barakac.
4. Marna ma dhic karto in qof dal ku barakacay laga dhigo lahayste.

**Mabda'a 13**

1. Marna waa in ee yan dhicin in caruur barakacday loo isticmaalo ama loo ogolaado in ee ka qeebqaatan colaado.
2. Dadka ku barakaca dal waa in laga ilaaliya takoorid xagga qoritaan ciidan ama koox iyada oo sabab looga dhigaayo barakacooda.  Siiba lama ogola falal cadownimo, insaaniyad laan ama duleeyn ku khasbaysa oglaansho ama diidid qoritaan ciidan.

**Mabda'a 14**

1. Qof kasta oo dal gudihiis ku barakaca wuxu xaq u leeyahay xuriyada socod iyo awood u ku doorto meesha u degaayo.
2. Siiba, dadka dalka ku barakaca waxay xaq u leeyihiin in ee si xor ah ee u gala baxaan xeryahaas iyo degaamada.

## Mabda'a 15

Dadka dal gudihiisa ku barakaca waxay leeyihiin:

(a) Xaqqa in ee badbaado ka raadsadaan qeeb kale oo dalka ka mid ah;
(b) Xaqqa in ee dalkooda ka tagaan;
(c) Xaqqa in dal kale weedistaan magangelyo; iyo
(d) Xaqqa in laga badbaadiyo celin khasab ah ama degin meel noloshooda, badbaadadooda, xuriyadooda ama/iyo caafimaadkooda halis u ah.

## Mabda'a 16

1. Dadka barakac gudaha ah u ku dhaco waxay xaq u leeyihiin in ee ogaadaan waxay ku suganyihiin ama meesha ee joogaan qaraabadooda la weeysanyahay.
2. Haya'adaha qaran ee arrintu khusayso waxay isku deyayaan in ee hubiyan xaaladda iyo meesha ee ku suganyihiin dadka dalka gudiihiisa ku barakacay oo lagu warbixiyey in la weeysanyahay iyaga oo la kaashanaaya haya'adaha caalamiga ah oo arrimahaas ku hawlan. Waxay na la socodsiinayaan qofka ugu xigaal dhow qofkaas baaristu meesha ee marayso iyo wixii ka soo baxa.
3. Haya'ada ee arrintu khusayso waxay ku dadaalayaan in ee helaan oo hubiyaan aqoonsiga meedka kuwa dhinta, iyago hubinaaya in aan meedka la googoyn, u na celyaan xigaalkiisa ama u aasaan si ku haboon.
4. Qoboorta lagu aaso dadka dal guudihiisa ku barakaca waa in la badbaadiya oo la ixtraama mar kasta. Dadka barakacay na waa in ee mar kasta xaqq u leeyihiin in ee booqdaan qubuurta dadkii ka dhintay.

## Mabda'a 17

1. Qof kasta oo lab ama dhadig ah waxay xaq u leeyihiin in la ixtiraamo noloshiisa qoos.
2. Si loogu suurageliyo xaqqaas dadka dal ku barakaca, waa in loo ogolaada xubnaha qooskaas oo doonaaya in ee wada joogaan.
3. Qoosaska ku kala firdha barakaca wa la iso keenaya sida ugu dhakhso badan. Talaba kasta ee haboon waa in la qaada si la isgu geeyo qoosaskaas, siiba markii ee caruur arrinto khusayso. Haya'adaha masuulka ah waa in ee fududayaan baafinta qoosku u sameeyo waana in ee dhiirigeliyaan oo isla kaashadaan haya'adaha samafalka ee ku hawlan isukeenidda qoosaska.
4. Xubnaha qoos ee dal ku barakaca ee xuriyadooda lagu koobay xirid ama xero ee yan ka bixikarin, waxay xaq u leeyihiin in ee meel ku wada sugnaadaan.

**Mabda'a 18**

1. Dadka dal gudihiisa ku barakaca oo dhan waxay xaq u leeyihiin heer nololeed oo ku filan.
2. Ugu yaraan, si kasta duruuftu ha ahaat ee, iyo takoor laan, haya'adaha ee arrintu khusayso waxay dadka barakacay u hubinaayaan in si nabadgelyo leh ee u helaan:

    a. Cuntada daruuriga ah iyo biyo la cabbi karo;
    b. Degaan ku filan;
    c. Dhar ku haboon; iyo
    d. Adeeg caafimaad iyo nadaafad ee daruuriga ah.

3. Dadaal gaar ah waa in la sameeya sidii haweenku si buuxda uga qeebqaadan lahayeen qorsheynta iyo qeebinta adeegyadaas daruurig ah

**Mabda'a 19**

1. Dhamaan dadka gudaha ku barakacay oo dhaawacan ama buka iyo kuwa naafada ah waxa sida ugu suuragalsan oo degdegsiiya badan loo fidinayaa gargaar caafimaad iyo xannanada ee u baahanyihiin iyada oo la tixgelinaayo xaaladooda caafimaad oo keli ah. Markii loo baahdo, dadkaas dal ku barakaca waxa loo suuragelinaaya in ee helaan adeega dhakhaatiirta dhimirka iyo mid bulsho.
2. Waxaa fiira gaar ah la siinaya baahida gaar ee haweeynka, oo ee ku jirto in ee helaan adeeg caafimaad oo ee siiyan haweeyn adeega caafimaadka u fidinkara, sida wixi la xiriir dhalmo iyo la talin haweeynka loo geestay fara xumeeyn.
3. Waa in fiira gaar ah loo lahaada ka badbaadinta cudurada faafa oo u ka mid yahay AIDS si ee yan ugu faafin dadkaas gudaha ku barakacay.

**Mabda'a 20**

1. Qof kasta oo baniaadam ah wuxu xaq u leeyahay in meel kasta loo tixgeliyo dadnimadiisa sharciga hortiisa.
2. Si xaqqaas loo fuliyo dadka gudaha ku barakacay, haya'ada ee khusayso waa in ee u fidisa waraaqaha loo baahanyahay si xuquqda sharci oo ee xaq leeyhiin ee u helaan, kuwa oo ee ka midyihiin baasaboro, waraqo aqoonsi, waraqo dhalasho iyo kuwa cadayn guur. Siiba waa in ee haya'adaasi fududaysa u samaynta waraaqo cusub oo bedel u noqda kuwi kaga lumay barakaca, iyado aan lagu xireen shuruudo adag oo aan macquul ahayn, sida iyado laga dalbo in ee ku noqda meelihii ee hore u deganaangireen si ee waraaqaha u helaan.
3. Haweenka iyo raggo waa in ee lahaadaan xuquuq siman marka ee helyaan waraaqaha loo baahanyahay, iyo xaqqa in waraaqaha lagu siiyo magacooda.

**Mabda'a 21**

1. Qofna lagama qaadi karo, si aan sharci ahayn, hantidiisa iyo waxa u haysto.
2. Hantida iyo alaabta dadka dal ku barakaca mar kasta waa la difaacaya, si gaar ah, waxaa laga difaacaya falalka soo socda:

   (a) Boob;

   (b) Weerar toos ah ama mid guud ama falal colaad;

   (c) In ciidan hantidaas gabaad loga dhigo;

   (d) In aarsi wax loo yeelayo; iyo

   (e) In la burburiyo ama la qaato iyada loola jeedo ciqaab guud.

3. Hantida ama alaabta ee ka tagaan dadka dal gudihiisa ku barakacay, waxaa laga badbaadinaaya burburin, iska qaadasho sharci daro ah ama degid iyo ku dhaqan sharci daro ah.

**Mabda'a 22**

1. Dadka dal guudihiisa ku barakaca, haddi ee xeryo ku jiraan iyo haddi kale, lama takoori karo barakacaas daraadii xagga helitaanka xuquuqda hoos ku qoran:

(a) Xuriyadda fikir, damiir, diin ama waxaa u aminsanyahay, ra'ayi ama hadal;
(b) Xaqqa in u si madax banana u doonto shaqo iyo in u ka qeeb qaato dhaqdhaqaqa dhaqaale;
(c) Xaqqa in u si madax banana iyo sinaan ah uga qeeb qaato arrimaha beesha;
(d) Xaqqa cod bixin iyo ka qeeb qaadaho waxyaalaha khusaya dawladda iyo bulshada, oo ee ku jirto in ee u furantahay waxyaaba u suurgelinaaya ka qeebgaadashada; iyo
(e) Awooda ku hadal afka ee yaqaaniin.

**Mabda'a 23**

1. Si logu hubiyo xaqqaas dadka dal guudiihiisa ku barakacay, haya'adda ee arrintu khusayso waa in ee hubisaa in dadkaasi, siiba caruurta, helaan tacliin lacag laan ah oo khasab ah ee dugsiga hoose. Barnaamijka tacliintu waa in u tixgeliya dhaqankooda, afkooda iyo diintooda.
2. Qof kasti wuxu xaq u leeyahay waxbarasho.
3. Dadaal dheeraad ah ba la qaadaya si loo hubiyo in haweenka iyo gabdhuhu ee helaan tacliin dhan oo siman.
4. Gooba tacliin waa in loo fidiya dadka dal ku barakaca, siiba haweenka iyo dhalinyarada, haddi ee xiryo ku jiraan iyo haddi kale ba, marka ugu horaysa oo ee suragasho.

## QAYBTA IV – MABA'ADIIDA LA XIRIIRA SAMAFALKA

### Mabda'a 24

1. Kaalmooyinka samafal oo dhan waxaa lagu fulinaaya mabda'a baniaadaminimo iyo eexasho iyo takoorid laan.
2. Samafal loogu tala galay dad dal guudihiisa ku barakacay looma weecin karo sababo sayaasi ama ciidan ah.

### Mabda'a 25

1. Waajibka iyo masuuliyadda koobaad ee kaalmo samafal oo loo fidiyo dadka dal guudihiisa ku barakacay wuxu saaranyahay dawladda qarankaas.
2. Haya'adaha samafal ee caalamiga ah iyo kuwa kale oo kalmada fuliya waxay xaq u leeyihiin in adeegyadooda u fidiyaan dadka dal gudihiisa ku barakacay. Kalmo siintaas waa in aan loo qaadan mid liddi ama faragelin ku ah Dawladda, waxaa na loo qaadanaaya mid niyadsami loo fidiyey. Oglaasho na waa in aan loo diidin, siiba marka dawladda ee khusayso ee yan ama awood u lahayn ama rabin in ee u fidiso kalmada samafal ee loo baahanyahay.
3. Haya'adaha ee khusayso oo dhan waa in siiyan oo fududayan xuriyada marinta kaalmada samafal iyo in ee dadka samafalkaas ku hawlana u ogoolaadaan in ee la xiriiraan dadka barakacay.

### Mabda'a 26

Dadka ku hawllan kaalmo samafal, gaadiidkooda iyo adeegooda waa la ixtiraamaya oo la badbaadinaaya. Ma noqon karaan kuwa la weeraro ama dagaal lagu qaado.

### Mabda'a 27

1. Ha'adaha caalamiga ah ee samafalka iyo kuwa kale oo arrimahaas ku hawllan, marka ee kalmada bixinaayaan, waa in ee ilaaliyaan badbaadada iyo xuquqda aadamiga ah ee dadka ku barakaca dal gudihiisa, iyago oo qaadaaya talaabada ku haboon. Iyago sida sameenaaya, waa in ee ilaaliyaan shuruudaha caalamiga ah iyo habka shaqo oo loo degiyey arrimahaas.

2. Qodobada kor ku qoran wax u ma dhimayaan waajibka badbaadin ee ha'adaha caalamiga ah oo loo xilsaaray arrimahaas, taas oo adeegeeda u fidineesa Dawlada ama ee Dawladu ka dalbeeso adeegaas.

## QEEBTA V – MABA'ADIIDA LA XIRIIRA SOO NOQOSHO, DEGIN IYO DEB-U-DHEXGELIN MUJTAMACA

### Mabda'a 28

1. Ha'ayadaha ku shaqa leh ayo saaranyahay waajibka iyo masuuliyadda koobaad si ee u suurageliyaan xaalado, iyo awood siin, u suuragelinaaya dadka dal gudihiisa ku barakacay si ee rabitaankood ugu noqdaan guryahoodi ama meelihii ee deganaanjireen, ama in ee doortaan in ee meel kale oo dalka ah degaan. Haya'adahaasi waxay isku deyayaan in ee fududayaan deginta dadkaas noqonaaya iyo in ee dib u dejiyaan dadka barakacay.

2. Waa in dadaal gar ah loo gala sidii loo hubin lahaa in dadka dal gudihiisa ku barakacay ee ka qeeb qaataan qorshaha iyo fulinta soo noqodkooda iyo dib u degintooda.

### Mabda'a 29

1. Dadka dal gudihiisa ku barakacay oo ku soo noqda guryahoodi, meelihii ee deganaanjireen ama dalka meel kale ka dega, waa in aan la takoorin iyado loo eegaayo barakaca ku dhacay. Waxay xaq u leeyihiin in ee si buuxda iyo sinaan ah uga qeebqaataan talad dalka oo heer kasta, ee na dadka u la simanyihiin adeeg guud.

2. Haya'adaha ku shaqa leh, waxaa wajib iyo masuulid ka saarantahay in ee gacan ku siiyaan dadka soo noqday iyo/ama iyago barakacay dib loo degiyey, in ee intii suragal ah gacan ku siiyaan sidii ee hantidoodii iyo wixii ee lahaayeen, oo ee ka tageen ama laga qaaday loogu celiyo. Haddii dib-u-celin hantidaas ee yan suragelin, haya'adahaas waxaa waajib ku ah in ee dadkaas siiyaan cawil celin u dhigma hantidii ee waayeen ama sidii kale oo arrintooda cadaalad looga gaari lahaa.

### Mabda'a 30

Haya'adaha ee khusaso oo dhan, waxay u ogolaanayaan una fududaynayaan haya'adaha samafal ee caalamiga ah iyo dadkii kale oo samafal ku hawllan sidii ee u fulin lahaayeen wajibaadkooda si deg deg ah oo ee ku la xiriirkaraan kalmo na ugu fidinkaraan dadka dal gudihiisa ku barakacay sidii logu celinlaha guryahoodi ama dib loo degin laha.